



## **Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

### **WAR-SAXAAFADEED 023/2009**

Nayroobi: 31 July 2009 - Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS) ayaa u qabanaya kulan aqoon iswaydaarsi ah taliyayaashii hore ee Ciidamadii Qalabka siday ee Soomaaliyeed, waxaana shirka lagu marti gelinayaa magaca Wasaaradda Gaashandhigga Soomaaliyeed. Shirka waxaa lagu qabanayaa Washington DC inta u dhaxaysa 1-5 Agoosto 2009.

Shirkan aqoon iswaydaarsiga ah waxa uu la xiriiira shir hor-udhac ahaa ee laqabtay bishii Juun 2009. Waxaana shirkan hadda dhacaya ka soo qaybgalaaya taliyayaashii hore ee ciidamadii qalabka siday- haddii ay ahaan lahaayeen militari, Poliis, Asluubta, iyo kuwii Nabad Sugiduba. Waxayna wada hadal qoto dheer ka yeelanayaan qaab-dhismeedkii hore ee ciidamada sida uu ahaan jiray (taariikh ahaan) iyo sida hadda loo dhisikaro loona xoojin karo awoodda Hayadaha Nabad-gelyadda u qaabilsan Ummadda Soomaaliyeed.

Shirkan waxa uu fursad u siinayaa taliyayaashii hore ee ciidamada Qalabka siday in ay wixii aqoon iyo waayo aragnimo ah ee ay horay u lahaayeen ugu gudbiyaan ama la wadaagaan madaxda hadda jirta. Natiijadda laga filayo shirka kuma koobnaandoonto kor u qaadida wacyiga iyo aqoonta ciidamada ee waxaa la filayaa in ay door ka ciyaarto sidii horay loogu marin lahaa isafgarad buuxana looga gaari lahaa habka lagu hagaajinayo Hayadaha Nabadgelyadda u Qaabilsan Soomaaliya.

“ Iyadoo maanka lagu hayo nuxurkii Geedi socodkii Jibuuti, ayuu aqoon iswaydaarsigan fursad siinayaa madaxdii hore ee ciidamadii Soomaaliyeed si ay uga qaybqaataan dib udhiska wadankooda”, ayuu yiri Ahmedou Ould-Abdallah, Ergayga Gaarka ah ee Qarammada Midoobay.

Mudada uu shirkan socdo, ka qaybgalayaasha shirka waxa ay soo saari doonaan qoraal qeexaya habkii wax looga qaban lahaa dhibaataada ama Caqabadaha hadda jira ama wakhtiha dhowba iyo siddii kor loogu qaadi lahaa awoodda wax qabad ee hayaddaha Nabadgelyadda Qaabilsan mudada fog.

“Taariikhdu waxbadan baan ka baran doonaa haddi aan doonayno in aan ka faaidaysano wixii horay u dhacay- ha ahaadeen wixii guul ama khasaaro ah ee jiray. Saraakiishan sar-sare waxay heestaan fursad ay wax ugu biirin karaan dib-udhiska wadankood,” ayuu yiri Ould-Abdallah.